



Cod bixinta doorashooyinku waa sida ugu awood weyn ee dareenkaga loo ogaan lahaa. Cod bixintu sideedaba ma ahayn xaq uu leeyahay qof kasta oo Maraykanka jooga. Sidaas darteed, waa arrin gaar u ah qof kasta oo Mawaadin ahi inuu guto xaq uu cod bixinta doorashooyinka oo dhan u leeyahay. Waa xor, isla markaas waa mus'uulid saaran Mawaadinka.

Hase yeeshe, dadka aan ahayn Mawaadinintu way ka qeyb qaadan karaan ololaha doorashooyinka - iyagoo dadka kale ka caawinaya sidii ay isu diiwaan gelin lahaayeen, shirar loo qabto, abaabul aqoon iswaydaarsi, kulamo lagu sameeyo dugsiyaga iyo keniisadaha. Taasoo looga dan leeyahay sidii looga wada hadli lahaa arrimaha khuseeya, qoysaskooda iyo dariskooda xaq u leh cod bixinta. Isla markaasna ay qayb ka qaataan ololaha cod bixinta iyo doorashooyinka.



Ayaa Cod bixin kara?

Inaad cod bixiso waa inaad tahay:

- Mawaadin Maraykan
- Da'daadu gaartay 18 sano
- In aadan xabsi ugu jirin fal dembiyeed culus ama sharuud lagaaga siiday.
- Is diiwaan geliso 15 beri ka hor doorashooyinka.
- Mawaadinka cusub waxa iska diiwaan gelin karaa xafiiska Diiwaan ahayaha muddo 7 beri ka hor doorashada,

**Haddii aadan cod bixin Karin,
waxaad ka qayb qaadan kartaa
hawlahada cod bixinta. Waa XAQ
aad leedahay!**

Sidee ayaan isu diiwaan geliyaa?

Waxaad isu diiwaan gelin kartaa inaad cod bixiso, adigoo buuxiya xaashida Diiwaan gelinta Cod bixiyaha adigoo xaadir ah, ama boostada ku dalbada ama khadka Shabakadda Internetka kala soo baxa xaashida.

Waxaad ka heli kartaa xaashida diiwan gelinta Cod bixinta:

- Xafiiska Boostada dariskaaga ah,
- Wakaaladda Bulshada,
- Maktabadda Darisgaaka ah.,
- Xafiiska adeegayad Bulshada,
- WIC xafiiskooda,
- DMV (Gaadiidka) xafiiskooda,
- Xafiiska Diiwaan gelinta Cod bixiyaha ee Deegaanka oo ah 1555 Berger Dr., Bldg. 2 in San Jose. Waad tegi kartaa si aad u hesho xaashidam ama waxaad wici telefoonkan (408) 299-VOTE (8683.)

Waxaad kala soo bixi kartaa shabakadda Internetka ciwaanka ah www.sccvote.org ama xafiiska California Secretary of State cinwaanka www.ss.ca.gov. Hase yeeshe, waxaad u baahan doontaa inaad saxeeexo oo aad dib boostada ugu dirto xafiiska diiwaan geliyaha degmadaada.

Xusuusnaw:

- Xaashiyuhu waxay ku qoran yihiin luqado badan
- Waa inay cidii kaa caawisaa buuxinta xaashida aad rabto.



- Xaashida waxa lagu diri karaa bostada umana baahna tigidh.

Maxaa dhici marka aan is diiwaan geliyo?

Saddex usbuuc doorashada ka hor, waxaad ka heli xafiiska Diiwaan Geliyaha Cod bixiyaha xaashiyo loo yaqaan "Sample Ballot," oo soo koobaya waxa ay yiraahdeen arrimaha taagan musharaxiintu rabta in la doorto. Isla xaashida ayaa kuu tilmaami doonta goobta aad ka cod bixinayso.

Cod bixintu waa jid muhiim ah xaqna aad u leedahay in la maqlo codkaaga!!

Halkee ayaan ka heli waraka ku saabsan qodobada iyo musharaxiinta la doornayo?

Waxaad noqon kartaa cod bixiye xog ogaal ah haddii aad isticmaasho macluumaadka kala duwan ee lagu hayo xarunta bulshadaada Meel kastaba aad ka heshid wararka ee mar kasta hubi inaad fahmatay arrimaha laga hadlayo iyo musharaxiinta intaba.

Waxaad ka baran kartaa arrimaha iyo musharaxiinta adigoo isticmaala ilahan hoose:

- La falaqeynta qoyskaaga iyo dariskaaga,
- **Qoraalka fudud ee Tilmaamaha Cod-bixinta ee ay qoreen ururka League of Women Voters**, kaasoo si fudud loo fahmi karo. Waxaad ka heli kartaa Maktabadaha, ururada Bulshada iyo xafiiska diiwaan geliyaha doorashooyinka.
- Dhageysiga Raadyooga,
- Khubadaha iyo hadalka fagaarayaasha,

- Qoraalada Ololeynta, ogsiisyada, warqadaha iyo macluumaad sidiyaasha ee bosta ku yimaada
- Doodaha Telefiishinka,
- Jaraa'idka,
- Akhriska jaraa'idka iyo daawashada warka telefiishinka.
- La kulanka musharax ama sarkaalka la shaqeeya oo si toos ah u su'aasho arrimaha.
- La xiriirto xarunta xisbiga aad danaynayso oo weydii inay kuu soo diraan wararka aad rabto.
- Talada aad ka hesho xisbiga aad ku jirto ama afkaartiisa raacsan tahay, sida PTA.
- *Project Vote Smart* ayaa ah mushruuc laga helo wixii wara ah ee ku saabsan arrimaha iyo musharaxiinta. Waa mushruuc aan xisbi gaar ah taaegersanayn oo falanqeeya waraka khuseeya doorashooyinka wadanka oo dhan. Waxa ay ururiyaan macluumaadka tirade iyo arrimo badan oo kale. Kala xiriir: 1-888-VOTESMART (1-888-868-3762) or go online at www.vote-smart.org.

Waxaan jeclahay inaan boostada ku diro codka,? Maxaan sameeya?

Cod bixinta boostada waxa la yiraahdaa "Absentee Ballot" waa fursad uu heli karo qof kasta oo mawaadin ahi; waxaad u baahan tahay inaad sabab gaar ah haysato. Dad badan ayaa jecel "Absentee Ballot" sababta oo ah inay guriyahooda cidlada ah ku cod bixin karaan, oo ay qoyskooda ama koox badan ku cod bixin karaan.

Goorma ayaan codsan karaa Absentee Ballot?

Waxaad codsan kartaa muddo 29 beri ka hor doorashooyinka adigoo warqad u qoraya xafiiska Diwaan gelinta Cod bixiyaha, ama ku diraya codsi baxaya shabakadda Internetka xafiiska California Secretary of State's website (www.ss.ca.gov.) Markaas Xaashida cod bixintaada ayaa boosta lagu soo dhigi.



Maalinta ugu dambaysa ee la dalban karo xaashidaasi waas 7 beri doorashada ka hor. Ku dar codsigaaga wararka ku saabsan arrimaha hoose:

- Magaca iyo maalinta doorashada.
- Ciwaankaaga diiwaanka ku jira
- Ciwaanka uu joogo cod-bixiyuhu ee loo dirayo xaashida Absentee ballot-ka
- Saxeexaga sida uu diiwaanka ugu qorany hayay
- Telefoonka iyo taariikhda dhalashadaada n

Goorma ayaan diraa absentee ballot-ka?

Waa inuu gaaraa absentee ballot-ku maalinta doorashada ka hor. Waxa kale oo aad geyn kartaa absentee ballot-kaaga shaqsiyan goobta cod bixinta inta ka horaysa 8:00 fiidnimo maalinta doorashada.

Waxaan ahay naafo oo ma gaari karo goobta cod bixinta, side ayaan u gudbiyaa absentee ballot-ka?

Waxaad u xil saari kartaa qof qaraabada ku dhow ah inuu gaarsiiyo cod-bixintaada asagoo wakiil ka ah. Deegaanka Santa Clara County, waxa kale oo aad dalban kartaa xashida cod-bixinta-maqane ee doorashooyinka soo socoda mustaqbalka haddii aad naafo thay ama aad xanuun darani ku hayo. La xiriir xafiiska Diiwaan Geliyaha si aad war dheeri ah uga heshid arrimahaas.

Waxaan mawaadin noqoday ka dib xilgii loo qabtay xaashiyaha cod-bixinta, maxaan yeelaa?

Haddii aad mawaadin noqotay ka bid markii ay dhaaftay xilgii la qaadanayay xaashiyaha cod-bixinta, waad cod-bixin kartaa 7 beri ka hor haddii aad is diiwaan gelyso. Haddii aad iska diiwaan geliso xafiiska diiwaan geliyaha waxa la arkaa inaad isla maalintaasba cod-bixiso. Markaas waa inaad keento:

- Shadadda jinsiyad-bedelka
- Aqoonsi

cod-bixinta-maqanuhu waa arrin fudud oo sahli karta in koox lagu cod-bixiyo, ka abaabul bulshadaada "maalinta cod-bixinta-maqaneyaasha"

Waa maalintii cod-bixinta, waa maxay talaabada iigu horeysaa?

Talaabada inoogu horeysa waa inaad tagno goobta cod-bixinta!!! Ka hubso xaashida tusaalaha ah ee horay laguugu soo diray, ogow meesha ay bulshadiinu ka cod bixinayso saacadaha cod-bixinta waa 7 sux ilaa 8 fiidka.

Cod-bixintu waxa ka dhacdaa goob kala duwan oo ka tirsan bulshadda sida:

- Kaniisadaha
- Dugsiyada
- Xarumaha Bulshada
- Goobaha Ganacsiyada
- Geerashyada, iwm.,...

Omaalinta Doorashada...

1. Marka hore hubi dadka uga shaqeynaya doorashada iskood. Waxa ay:
 - Ku weydiin magacaaga,
 - Waxay kuu baadhi liisga qoran ee cod-bixiyeyaasha,
 - Waxay kaa codsan inaad saxeexdo liiska magacaagy ku jiro,
 - Waxay gacan ka saari xaashida cod-bixinta. (xasuusnow, waxa ku wehelin karaa qof wax kuu qora ama aad kaalmaysato marka aad cod-bixinaysid.)
 -



2. Waxaa calaamadin xaashidaada cod-bixinta.

- Waxaa geli meel daah har, oo gaar kuu ah,
- Waxaad calaamadayn xaashida ood ku muujin xulashadaada.

3. Waxaad xaashida ku ridi sanduuq nix, marka aad cod-bixinta dhamaysato.

Ma cod-bixin karaa xataa haddii aanan fahamsanayn arrimaha loo codaynayo oo dhan?

Haa. Waad cod-bixin karta adigu haddad rabto arrimaha si yar ama si aad aad ula socotid eh. Waxa ugu muhiimsan inaad wax ka ogtahay arrimaha ama cidda la kala dooranayo.

Maxa dhici hadii aan ku qaldomo xaashida co-bixintayda maalinta doorashadaat?

Haddii aad qaladdo xaashida u sheeg kaliya cidda ka shaqeynaysaa cod-bixinta, wey kuu bedel xaashida oo mid cusub ayay ku siin. you make a mistake on your ballot, simply let the poll worker know and they will give you a new ballot.

Haddii aan dareemo maalinta doorashada in laygu cabsi gelayo goobta cod-bixinta maxaan ila gudboon?

Waa xaquuq mawaadin kastaa leeyahay in uu codka dhiibto cabsi, caga-juleyn iyo takoor la'aanis. Haddii aad dareento in lagu cabsi gelayo inta aad sugayso cod-bixinta, waxaad la xirriiri kartaa xafiiska Diiwaan gelinta Cod-bixiyeyaasha ama xafiiska xoghayaha Gobolka (Office of the Secretary of State.) Haddii aad dareento in lagugula kacay dembi jinsi nacayb ah la xiriiri xafiiska Lidka Naceybka telefoonkiisa furan 24ka saac. (24 Hr Anti-Hate Hotline at (408) 279-0111. ama the Immigrant Q & A Information Line. (See the bottom page for telephone numbers.)

Waayo-araga cod-bixintu waa inay ku xiisa geliso, soo sheeg maalintaas cidda kuu caga-jyleysa ama nacayb kuu muujisay!!

Arrimaha in la xasuusto ah marka la cod-bixinayo

- In lagu kaalmeyo waad codsan kartaa.
- Saaxiib waad kaxaysan kartaa.
- Xusuus waad qoran kartaa.
- Wax kasta inaad u cod-bixiso ma ha inaad codbixiso darto kaliya.
- Haddii aad qalad samayso, waa warsan KARTAA xaashi kale!!



League of Women Voters'

Tel: 1 (800) 870-VOTE

The Office of the Registrar of Voters

1555 Berger Dr., Bldg. #2, San José 95112

Tel: (408) 299-VOTE (8683)

Poll Workers: (408) 299-8344

Spanish: (408) 299-8344

Vietnamese: (408) 299-8345

Chinese: (408) 299-8660

Office hours: Monday-Friday, 8am-5pm



Project Vote Smart

Tel: 1 (888) VOTESMART (1 (888) 868-3762)

For information by phone in Spanish and English

Tel: 1 (888) 622-SMART

Website: www.vote-smart.org

Voter Assistance Hotline- Office of the Secretary of State

Tel: 1 (800) 345-VOTE

Services, Immigrant Rights & Education Network

778 N. 1st. St. Ste. 200, San José 95112

Tel: (408) 286-5680

Immigrant Q& A Information Line: (see below)

